



# QASHIN-TUURID?

# KAMA DHACAYSO WADDAYDA

CJ, WREXHAM

## WARQADAHA MACLUUMAADKA QASHINKA.

TALOYIN WANAAGSAN OO KU SAABSAN  
SIDA SAXDA AH EE LOO DUURI/ASTURI KARO  
QASHINKA GURYAHA IYO ALAABTA WEYN EE  
QASHINKA AH EE GURYAHA.



cadwch keep  
gymru'n wales  
daclus tidy



## #FLYTIPPINGNOTUPMYSTREET

HAD IYO JEER HUBI INAY YIHIIN SHIRKAD QASHIN-QAADIS OO SHATI KA HAYSTA HAY'ADA KHAYRAADKA DABIICIGA AH EE WALES.



# DHIBAATADA...

Wales waxa ay muddo dheer ugu sarraysay Boqortooyada Midowday marka laga hadlayo dib u warshadaynta qashinka waxayna ku jirtaa kaalinta saddexaad ee aduunka.<sup>1</sup>

Iyada oo ay arrintaasi jirto, waxaa haddana wadanka ka dhaca qashin ku soo tuurista wadooyinka, taasina mana aha oo keliya wax aad u xun in la eego laakiin sidoo kale waxay waxyeelleyneysaa deegaanka.

Marka loo eego xogtii 2021/22, in ka badan 41,000 oo kiis ayaa laga diiwaan geliyay Wales sanadkii hore.<sup>2</sup> Qashin ku soo tuurista wadooyinka/biya-mareenada waxay dowlada ka khasaarisaa lacag dhan £72 daqiiqaddii iyadoo qashin-tuurista noocaas ah ay dhacaan celcelis ahaan 12 ilbiriqsi kasta meel UK ah.<sup>3</sup>

Marka loo eego xogtii 2020/21, 3-da nooc ee qashin-tuurista ugu sarreeya waxay ahaayeen: alaabta 'kale' ee qoysaska (18,514), bacaha madow ee guriga (11,459) iyo alaabaha cad (2,236). Inta badan kiisaska waxay ahaayeen cabbir ahaan kuwo la eg baabuur yar ama wax buuxin qeybta dambe ee gaariga ama wax ka sii yar.<sup>4</sup>

Si kastaba ha ahaatee, cilmi-baaristeenu waxay muujisay in aanay mar walba fududayn in la sameeyo waxa saxda ah marka ay timaaddo tuurista qashinkaaga oo waxaa jiri karaan caqabado badan.

Dokumentigan waxa loo isticmaali karaa qalab ahaan si uu kaaga caawiyo in aad qashinkaaga si sax ah uga takhalusto ama si ka sii fiican - dhamaantood ka hortag!

# 41,000+

## KIISAS QASHIN-TUURISTA EE KA DHACAY WALES SANNADKII HORE

## QASHIN-TUURISTA WAXAY DOWLADA KA QASAARISAA

# £72/DAQIIQO

## MA OGEYD?

**IN QASHINKA UGA TAGTO WEELKA QASHINKA LAGU RIDO  
LOO AQOONSAN YAHAY QASHIN-TUURID WAXAANA LAGA  
YAABAA INAAN QASHINKAAS LA URURIN. WAXA KALE OO  
LAGA YAABAA IN LAGU GANAAXO.**

**MAAMULKA DEEGAANKA EE UK WAXAY SOO SAARI  
KARAAN GANAAX GO'AN OO U DHEXEEYA £150 IYO £400  
OO LOOGU TALAGALAY QASHIN-TUURISTA.**

1. <https://gov.wales/new-stats-show-wales-upholds-world-class-recycling-rates-despite-pandemic>

2. <https://statswales.gov.wales/Catalogue/Environment-and-Countryside/Fly-tipping/recordedflytippingincidents-by-wastetype>

3. Xaqiiqooyinka & Tirooyinka Qashin-Tuurista (nationwidehouseclearance.co.uk)

4. <https://statswales.gov.wales/Catalogue/Environment-and-Countryside/Fly-tipping/recordedflytippingincidents-by-wastetype>

# CADDEYN TA KHURAAFAADKA

- ✓ Ganacsatada sharci darrada ah waxay u muuqan karaan hab raqiis ah oo sahlan oo qashinka looga takhalusi karo, si kastaba ha ahaatee haddii qashinkaas ay dadkaas kaa qaadaan meelaha lagu sii tuuro, waxaad qeyb ka leedahay mas'uuliyadda waxaana laga yaabaa inaad la kulanto ganaax.
- ✓ Waa mas'uuliyadda kiraystaha guryaha inuu hubiyo in qashin-qaadaha uu yahay mid si sax ah shati u haysto. Haddii qashin-qaadaha uu shati haysto waxaad ku hubin kartaa [naturalresources.wales/permits-and-permissions/scrap-metal-dealers-public-register](https://naturalresources.wales/permits-and-permissions/scrap-metal-dealers-public-register)
- ✓ Haamaha/weelasha qashinka ee goobaha dadweynaha yaala ma aha meel loogu talagalay inaad ku rido qashinkaaga dheeraadka ah. In qashinka uga tagto weelka qashinka lagu rido loo aqoonsan yahay qashin-tuurid waxaana laga yaabaa inaan qashinkaas la ururin – waana lagugu ganaaxi karaa. Waxaad weelasha qashinka buuxdhaafiyey u sheegi kartaa kownsalka deegaankaaga: [gov.uk/find-local-council](https://gov.uk/find-local-council)
- ✓ 22 milyan oo jajabyada alaabta guriga ah ayaa qashin ahaan loo soo tuuraa gudaha Boqortooyada Midowday sanadkiiba, in ka yar 1 qof ee 10kii qofba ayaa qaada tillaabooyin lagu hagaajinayo. Xarumaha dayactirka ee deegaanka waa goobo ku siinaya qalabyo iyo aqoon si aad u hagaajiso alaabtaas. Goobaha dayactirka ee xaafaddaada ka raadi halkan: [repaircafewales.org/venues](https://repaircafewales.org/venues)

# CAAWIMAAD IYO KHEYRAAD

- Maalinta uruurinta weelashada qashina halkan ka ogow: [gov.uk/rubbish-collection-day](https://gov.uk/rubbish-collection-day)
- Xarunta dib u warshadaynta qashinka ee kuugu dhow ka ogow: [walesrecycles.org.uk/recycling-locator](https://walesrecycles.org.uk/recycling-locator)
- Xarunta dayactirka alaabta ee xaafadaada ka ogow: [repaircafewales.org/venues](https://repaircafewales.org/venues)
- Halkan ka ogow sida loo tuuro walxaha qashinka ah ee waaweyn: [gov.uk/collection-large-waste-items](https://gov.uk/collection-large-waste-items)
- Talooyin badan oo waxtar u leh oo ku saabsan dib u warshadaynta qashinka ka hel halkan: [recyclenow.com](https://recyclenow.com)
- Dukaamada samafalka ee kuugu dhow ayaa laga heli karaa halkan: [charityretail.org.uk/find-a-charity-shop](https://charityretail.org.uk/find-a-charity-shop)



I gooy oo igu dheji friijkaaga

## MAALMAHEENA URUURINTA WEELASHADA QASHINKA:

QASHINKA GURYAHA

DIB U WARSHADAYNTA

QASHINKA BEERTA

XARUNTEENA DIB U WARSHADAYNTA QASHINKA WAA: XARUNTEENA DAYACTIRKA EE UGU DHAW WAA:

# WAX WALBA UMA BAAHNA IN LA TUURO

22 milyan oo jajabyada alaabta guriga ah ayaa qashin ahaan loo tuuraa gudaha Boqortooyada Midowday sanadkiiba, in ka yar 1 qof ee 10kii qofba ayaa qaada tillaabooyin lagu hagaajinayo.<sup>5</sup>

Qiimaha alaabta guriga iyo alaabta cad ayaa ah sababta ugu weyn ee deynta loo galo marka loo guurayo guri cusub.

Maad badbaadsatid xoogaa lacag ah iyo deegaanka adiga oo hore u soo qaadanaya alaabta gurigaaga ee yaryar kuwaas oo laguugu hagaajin karo xarunta dayactirka ee xaafaddaada?

Xarumaha dayactirka alaabta ee xaafaddaada ka ogow halkan: [repaircafewales.org/venues/](https://repaircafewales.org/venues/)

Markaad isku daydo inaad hagaajiso/dayactir ku samayso fadhiga ama qalabka wax lagu kariyo ee si lama filaan ah u joojiyay shaqada, keliya kuuma badbaadayso boqolaal rodol, laakiin sidoo kale waxaad yaraynaysaa xadiga qashinka ee aad tuuri lahayd.

Xitaa waxaad waxyaabaha jajabay qaarkood iskaga iibin kartaa baraha internetka sida Facebook marketplace, Gumtree, Vinted, eBay, Freecycle iyo qaar kaloo badan.

Khasab ma aha had iyo jeer inaad soo iibsato waxyaabo aadan si joogto ah u isticmaalin - waxaad ka soo amaahan kartaa dadka kale - ka eeg maktabadda alaabta (Library of Things) ama Benthyc Cymru - [benthyc-cymru.org](https://benthyc-cymru.org)

Xitaa waxaad kiraysan kartaa shay hal mar waxaadna kaydin kartaa lacag dhan ££ - ama xitaa waxaad alaabtaada ku kireysan kartaa baraha/aaladaha internetka sida Fat Llama - [fatllama.com](https://fatllama.com)

5. Nicholson, K, 10 Oktoobar 2018, Resource.co, 22 milyan oo jajabyada alaabta guriga ah oo la tuuraa sannad kasta gudaha UK, Laga heli karo: <https://resource.co/article/22m-pieces-furniture-thrown-out-every-year-uk-12892>

## WAXA KALE EE AAD SAMAYN KARTO SI AAD ARRINTA GACAN UGA GAYSATO?

- Iska yareey isticmaalkaaga - faashinka gaabiska ah ee ma aha midka degdegga ah! Dukaamada samafalka waxay noqon karaan hab wanaagsan oo lagu helo dhar qiimo jaban oo cusub.
- Hayso koobka kafeyga lagu cabo oo aad dib u isticmaali karto si aad u yarayso qashinka ka yimaada waxyaabaha halka mar la isticmaalo. Maqaaxiyo badan ayaa hadda sidoo kale bixiya qiimo dhimis marka macaamilka uu isticmaalo koobabka dib loo isticmaali karo.
- Xaqiiji inaad haysato bacaha iyo weelasha qashinka ee saxda ah si aad dib ugu warshadayso qashinka hadba intii suurtoagal ah - tani waxay gacan ka gaysanaysaa inaad banaanka soo dhigin bacaha madow ee qashinka oo tiro badan.
- Ku faan bulshada xaafaddaada adiga oo ka soo warbixinaya kiis kasta oo qashin-tuuris ah oo aad aragto adigoo isticmaalaya [flytippingactionwales.org/en/report-incident](https://flytippingactionwales.org/en/report-incident)

## QASHIN-TUURID? KAMA DHACAYSO WADDAYDA

KA FUDUD SIDA AAD U MALAYNAYSO.  
KA RAIQSAN GANAAX

RAADI **GOOBAHA WAAWEYN EE URUURINTA QASHINKA** SI AAD U HESHO  
SIYAABO FUDUD OO AAD UGA TAKHLUUSTO ALAABTAADA AADAN RABIN.



STAVROULA, ABERGAVENNY

